

# KUSOO DHAWOOW WILLOW RESERVE



Kaalay oo baro 9 hektar oo ah magaalada quruxda badan ee ku taala Willow Reserve. Dadka tartiibta u socda si taxaddar lehba u dhagaysta waxaa soo dhaweynaya deerada, shinbaraha ciyaya, shinbiraha nooca ducks, balanbaalista, iyo raha. Sannadahaan danbe, bulshada iyo ururo saaxiibo ah oo badan ayaa ka shaqaynayay soo celinta geedihii asalka ahaa iyo in ay siiyaan habdhaqan wanaagsan dariskooda.

## Tog Taariikhi ah

Tog ayaa hadda kahor mari jiray dhulka aad hadda ku aragto waddada tareenka. Waxaa laga hoos mariyay dhuun waxaana lagu aasay dhulka hoostiisa markii aagga la dhisayay wuxuuna biyaha ku daraa baraaqta marka roobku da'o.

## Ka ilaalinta Daadadka Dariska

Baraaqta waxaa biyaha u keena dhuun qaadda biyaha daadadka oo marta bartanka dhulka lama dagaanka ah. Goobtaanu waxay keentaa faa'iido ayada oo kaydinaysa biyaha dheeraadka ah inta lagu jiro daadadka culus si looga hortago in daadad fatahmaan bulshada dariska la ah.

## U ilaalinta Xayawaanka Duurjoogta ah Geedaha Asalka ah

Waxaad ka heli doontaa caddaymaha xayawaanka duurjoogta ah guud ahaan dhulka lama dagaanka ah. Shaqo badan ayaa la galiyay si meesha looga saaro dhirta waxyeelada gaysata looguna baddalo geedihii asalka ahaa, dhirta yaryar, iyo ubaxyo sidii si wanaagsan loogu taageeri lahaa xayawaanka duurjoogta ah ee nooc kastaba leh.

## Wareeg 1.2 km ah

Soo bookhadeyaasha axaa lagu casuumayaa in ay wax ka bartaan Willow Reserve. Calaamadaha waddada la maraayo ayaa lagu soo kordhiyay si ay kuugu hagaan safarkaaga.

6.5 hektar  
oo dhul qoyan ah

Halkaan ayaaad joogtaa

## Shuruucda Xadiiqada

- ✓ Saacadaha xadiiqada: Qorax soo baxa ilaa 10ka fiidnimo.
- ✓ Fadlan waxyaabaha muhiimka ah ha ooga dhex tagin gaarigaaga
- ✓ Majirto goob baabuurta lagu xaraysto habeenkii
- ✓ Gawaarida matoorka leh waxay ku xaddidan yihiin goobaha baarkinka ah kaliya
- ✓ Sharciga eyga ee dhaqan galay: eeyaha waa in lagu xiraa xarig aan ka dheerayn 6 fiit
- ✓ Nadiifi rabaayaddaada
- ✓ Lama ogola ganacsi aan ogolaansho loo haysan
- ✓ Lama ogola shinbiraha iyo duurjoogta wax cunta
- ✓ Haysashada iyo cabidda khamriga waa laga mamnuucay
- ✓ Lama dhex dagi karo
- ✓ Dab laguma shidi karo

## Qaabka aad u caawin karto

Gacan ka gayso ilaalinta Willow Reserve adiga oo xaafaddaada nadiifinaya. Biyaha roobku waxay qashin ka soo qaadaan waddooyinka magaalada waxayna keenaan dhuumaha qaada biyaha daadadka kuwaas oo aada harooyinka u dhow, Willow Reserve, iyo Wabiga Mississippi.



## Wax badan ka Ogow

Scan for more information. | Escanea el código para más información | Yog xav paub ntxiv mus yees lub cim  
Lambarka halkan mari si aad u aragto faahfaahin | ၆၆၆ (၈၈၈) အိမ်သုံးကိစ္စအတွက်အချိန်အကန့်အသတ်မရှိဘဲ

WARD 5  
City Council



SAINT PAUL  
MINNESOTA

